

BUUGA DULMANAHA DAMBI WAX YEELAY VICTIM OF CRIME HANDBOOK

SOMALI



Helping Communities Assist Victims of Crime

Isdhaafsiga Dhaqamadda Qeybsan

“Crossing the Cultural Divide”

**Information for Immigrants and Refugees on Services
For Victims of Crime**

**Akhbaarta Muhaajiriinta iyo Qaxootiga, adeegyada
Dhibanayaasha Danbigu wax yeeleeyay.**

Kanada gudaheeda, qof walba waxaa xafida sharciga wawaanaa jira xuquuqo u gaara. Difaacidda sharciga qof walba, kuma xirna qofka asalkiisa, dhaqankiisa, sinjiyaddiisa, lab ama dhaddig amaba diintiisa. Waxaa kaloo jira mashruucyo iyo adeegyo loogu talagallay in lagu gacan qabato dulmanaha ku tabaaloobey danbiyadda. Muhaajiriinta iyo qaxootiga qaarkood waxaa laga yaabaa in aysan ogeyn amba la socon hab caawimaadka jira. Sidda badan waxaa dhacda in ay dulmanaha usuurto galiweydo helitaanka adeegyadda jira sababo la xiriira luqaddiisa iyo dhaqankiisa awgeed. Sidaa darteed, buug gacmeedkan waxaa loo sameeyey in la yareeyo xannibaadyadda jira, si loo yareeyo go'doomidda muhaajirinta iyo in la dhiso xiriro kadhaxeeya bulshooyinka soo haajiray iyo hab taakuleynta jirta.

This Handbook is also available in:

**Buugan waxaad heli Kartaa asagoo ku qoran luqadaha
soo socda:**

Amharic, Arabic, Chinese, French, Khmer, Kurdish,
Punjabi, Somali, Spanish, Kiswahili, Tigrigna,
Vietnamese

Tusmada Buuga

Table of Contents

Maxaad u akhirinaysaa Buuggan.....	3
Waayo arragnimo Socdaal (Soogalootigga).....	4
Marka Danbi dhaco ka dib - “Heerka kowaad”.....	5
Fursadaha aad leedahay marki dambi dhaco ka dib.....	6
Galitaanka nidaamka cadaaligga ah “Heerka labaad”.....	7
Faracyadda addeeyada dhibanayaasha ee Booliska Kusalyan.....	8
Faracyadda addeegyadda dhibanayaasha ee Beel kusalyan.....	8
Warbixinta waxyeelladda dulmanaha.....	9-10
Codsi diyada ama baan.....	11
Barnaamij guna lagacageedka.....	12-13
Macnaha Erreyadda.....	14-15-16
Aqoons i.....	17

(Ogow inturjumaad walba ee buugani kala duwanaan karto halka
ay ku taal sabab la xiriirta numberka iyo inta loodhaxeysoo
qoraalka)

Maxaad U Akhriyeysaa Buug Gacmeedkan?

Why Read this Handbook?

Buug gacmeedkani waxaa loogu talagaly in uu caawiyo muhaajiriinta iyo qaxootiga kuwaasoo ah dhibanayaasha dambi waxyeeleeyay, iyo kuwa doonaya in ay caawiyaan. Waxaa kaloo loogu talagalay in uu caawiyo "ka-gudubka hab dhaqameedka qaybsan" ee u dhexeeya beelaha muhaajiriinta iyo qaxootigga, iyo barnaamijyada caawiya iyadoo aw dhibanaha ka wacyi gelio.

Taas oo ay sababtay dhibka dhaqanka iyo luuqada ee haysta muhaajiriinta iyo qaxoontiga, ogaasho la'aan barnaamijyada jira awgeed dhibanaha muhaajirka ah waxaa soo foodsaara marxalado addag siiba markuu qofku sii dhexgallo niddaamka denbiyadda cadaaliga ah. Buugani waxow sharxayaa barnaamijyada, adeegyada iyo fursadaha gacanqabanaya dhibanaha dambi waxyeeleeyay.

Dhibane denbi waa qof wax yeeloobay danbi laga galay awgeed. Wuxuu ku dhici karaa qof kasta, wax laga xishoodana ma ah hadii uu addiga kugu dhaco. Danbi waa fal lagugu ganaaxi karo sharcii ahaan waayo mujtamacu waxow u arkaa wax yeeleyn.

Marka uu qofku dhax-galo nidaamka denbiyadda caddaaliga ah, dulmanaha wuxuu talaabo talaabo ula kulmi karaa hawl wadeeno aqoon dheeraada u leh arimaha cadaaladda. Kuwaas waxaa ka mida Boliiska, shaqsyaad u adeega mashaariic u gaara ah dulmanaha, qareeno shacbi, kuwo dawli ah, gar yaqaanno iwm... Qoddobadda hoos kuqoran waxay si tafatiran u xusayaan xubno doorar waaweyn kaciyaara nidaamka caddaalingga ah iyo dulmanaha:

1. Boolisku waa qaybta ugu muuqan og nidaamka denbiyadda caddaaliga ah ee Kanada. Dhacdooyin horay u dhacay awgeed, waxaa laga yaabaa qaar kamid ah muhaajiriinta iyo qaxootiga inay ka cabsadaan marka booliska loo wergelinayo denbi dhacay. Wadankan Kanada, Booliska iyo nidaamka caddaaliga ahiba waa inay si wadajira caawimo u fidiyaan, sharcigana xoojiyaan. **Wadankan Kanada Sharciyada waxaa loo sameeyey inay difaacaan dadka.**
2. Faraca addeegyadda dulmanayaasha ee Booliska-kusalaysan (eeg a boga 8aad).
3. Barnaamijka gargaarka dulmanayaasha ee beel-kusalaysan: (eeg bogga 8aad).
4. Qareen difaaca, woxow u doudahaeed qofka eedeeysanaha ah.
5. Qareenka dawligha ah waa Mudaciinta dawligha ah waxay metallaan dadweynaha. Mana ahan qareenka dhibanaha laakiin waa qof u xaqiijineysa maxakamada waxa danbigu yahay.

Waayo Arignimada Socdaalka

The Immigration (Newcomer) Experience

Markaad su'aasho qoys muhaajir (kan cusub) inuu ka waramo maalmihii ugu horeeyey Kanada, intay doonaan ha joogaane, ma ay iloobin dhacaddadii ugu horeeysay. Dhacdooyinkani waxay ku raagaan qalbigooda, sababtoo ah waxay dib u soo xasuusiyaan marxaladihii adkaa ee ay soo mareen.

Sida la og yahay, qoysasku waxay Kanada ugu soo haajiraan kuwo doortay sidaas iyo kuwo ay duruuftu kaliftay. Waxay kaloo qoyska walaac baddan ku reeba dhacdooyinkii ay horey usoo mareen marka ugu horeysa ee ay Kanada yimaadaan. Qoysasku waxay kaloo maraan wajijo muhaajirnimo oo kala duwan, soona xasuustaan xarbigii ay soo mareen iyo khasaarihii gaaray.

Sida badan qoysku wuxuu wajahaa sidii uu u soo saari lahaa nool maalmeedkiisa, una raadin lahaa quutal daruuriga iyaga iyo caruurtoodaba. Qoysku wuxuu kaloo muhimadda saaraa sidii u shaqo ku heli lahaa, dhib badan buu kala kulmaa. Si dhakhso ah waxuu qoysku u ogaadaan in tacliintooda iyo xirfadahoodii kala duwanaa aan laga aqoon sanen wadanka Kanada. Walaac badan ayaa la soo gudboonaada qoysaska. Fahamid iyo naxariis loo mujiyaa waxay qoyska muhaajirka iyo kan qaxootigaba ka caawisaa ka gudbida dhibaatooyin badan. U helida ile dhaqaale iyo maclumaaad ku filan waxay taakulo weyn siisaa soo galootiga cusub.

Dulmanuhu markuu ku cusub yahay Kanada, galana nidaamka cadaaliga ah, waxaa la soo gudboonaada culaab xad dhaafa ah. Waxaa laga yaabaa in eey ku suganyihii bii'ad ku cusub waxaana laga yaabaa in eey soo wajahdo la guboonaasho luqada iyo dhaqanka marka eey dhax galaan habka cadaaliga ah.

Qaybtani waxay ku tusaysaa waxaad sameyn lahayd hadaa tahay dulmane, sida:

- Hadii Waxa lagaa xado
- Hadii lagu cabsi galiyo
- Hadii lagu handado ama aad lakulanto jirdiid ama midab nacayb.
- Hadii jirdil ama fara xumayn lagugu sameeyey: (xataa haday katimid xaaskaaga ama qof qoyskaaga kamidda).

Ogow falalkan kor ku xusan waa khalad! Hadii aad tahay dhibane falalkaaan, waxaa jira barnaamijyo iyo adeegyo Adiga diyaar kuu ah.

Marka Denbi Dhaco: “Heerka 1aad”

After the Crime - Stage 1

- Hadii xaaladu tahay deg-deg wac adeega deg dega ah, 9-1-1 warbixin buuxda ka bixi wixi dhacay ilaa intaad ogtahay.
- Haddii aaney xalaadu deg-deg ahayn, tag saldhiga Booliska ee kuugu dhow, amaba dhabar jebinta denbiyadda loona yaqaano (RCMP) ee ka shaqeeya xaafaddaada. Waxaa lagu weydiin doonaa diiwaan gelin markhaatiyed; weligaana codso lamberka feylkaaga iyo weliba telefoonka qofka ku caawinaya.
- Wuxuu kalood codsan kartaa cid kuu turjuma, Beelaha waaweyn waxaad awood u leedahay in aad weeydiisato ruux Booliska katirsan oo afkaaga ku hadla.
- Hadii aad adigu kalsooni ka heleeydo qofna la helayo weey-diiso qof boliska ka tirsan oo rag ah ama haween ah (lab ama dhidig)
- Ku fakar in aad la timaato qof aad adigu ku kal soon tahay. Wuxuu baahan kartaa qof ku turjumta ama dhageysata oo akhbaar ka hesha sida wax u socdaan.
- Waxaa xataa codsan kartaa caawimo ku saleeysan boliska ama beesha oo barnaamijyada u adeega dhibanaha
- Saldhigyada booliska qaar-kood waxaa laga helaa xubno eega xiisadaha ama qulquladaha qoyska kuwaa soo ka kooban kuwo boliska ka tirsan iyo kuwa ka shaqeeye shaqo bulsho oo caawiya hadii qulqulado qoos jirto. Qulqulado qoys waxaa waaye marka rabsho ama fal danbi ka dhaco guriga, amaba mid qooska ka tirsan marka uu dhaawac u geesto mid kale oo qooska ka tirsan, falalka noacaasa sharcigeey ka so hor jeedaan Kanada xageeda.

Markii danbiga dhaco ka dib Fursadaha aad hasysato Options After a Crime has been Committed

Talaabadda 1'aad
Marka denbi dhaco

Si dhakhso ah ula xirir Booliska
Marki dambi dhaco
Wac addeega degdega ah: 911
Amaba tag xarunta Booliska ee kuugu dhow

Talaabadda 2'aad
Gelida habka Cadaaligga ah

Waydiiso adeegyada loogu talagalay dulmanaha

Hadaad doonto qoro arji kusaabsan waxyeelada kugaartay iyo sidii add xaaqaga u heli lahayd Codso in danbiiluhu bixiyo xaaqaga

Haddii aad xaq uleedahay Guno Lacageed codso

Tallaabada 3'aad
Wakhtiga u xadidan

Sida ugu dhakhsaha baddan ugudbi dacwadaada

- Booliska ku shaqulen
- Amaba Beesha ku shuqlan

Fadlan samee intaan lagu xukumin

Labo sano gudahood

Gelida Habka Cadaaliga Ah

“Heerka 2aad”

Entering the Justice System - Stage 2

Badanaaba waxaan u haysanaa in uu denbigu yahay wax ku dhaco dadka kale. Ma filano in danbi nagu dhici karo. Markuu denbi inala soo derso sida badan ma hubno cawimida aan heli karno. Hadii aad tahay dhibane danbi, gacan qabasho ayaad ka heli kartaa beeshaada.

CANADIAN STATEMENT OF BASIC PRINCIPLES OF JUSTICE FOR VICTIMS OF CRIME, 2003.

Afkaarta Kanada ee Jirida u ah Qawaaniinta Cadaalligga ee la dhaqanka dulmanaha, 2003.

Baaqyada ku sharfan Ururka Qaramada Midoobay, ee mabda'a aas aaska cadaaliga ah dhibanyaasha danbi wax-yeeleeyay; wuxuu ka walaacsan dulumyada iyo waxyeelooyinka danbi lagu wax-yeeleeyay gaar ahaan shaqsyaadka iyo bulshadaba; hubinaayana xaqquqdooda qof walba isagoo aqoonsan in dadka oo dhami si buuxdda ugu xafidan yihiin Xornimadda iyo Xuquuq Afkaareedka Kanada. Iyo welliiba afkaar deegaameedka ku shuqlan isu dheelitirka xuquuqaha dulmanayaasha iyo danbilayaasha, ee heer dawladeed, gobol, degmo, mid deegaan iyo mid soohdimeedba. Wasiirada masuul ka ah cadaalad denbiyedyada waxey isku raaceen in qdobadan hoos kuqorani hogaan u noqdaan la dhaqanka dulmanaha, gaar ahaan marka nidaamka cadaaligga ahi socdo.

Qdobada hoos kuqorani waxay si taftiran ugu ololeeyaa daacad uladhaqan dulmanayaasha taasoo ka turjumaya sharciyda, mabaadidda iyo nidaamyo dawladeedka, goboleedka, deegaameedka iyo mid sohdimeedba.

1. Waa in dulmanaha loola dhaqmaa si mudnaan, qadarin iyo xushmadi ku dheeantahay.
2. Waa in xogta dulmanaha la qaderiyaa loona tixgeliyaa sidda ugu haboon
3. Waa in taxadar kasta oo mac-quula la sameeyaa si khalkalka loga yareeyo dhibanaha.
4. Waa in mar walba la tixgeliyaa nidaamyadda habka cadaaligga ah oo dhan, lana adeegsadaa cabiraadaha ugu haboon, haday noqoto in dulmanaha laga difaaco hanjabaad iyo aargoosasho kutimaata
5. Waa in dulmanaha warbixin buuxdda laga siiyaa sidda nidaamka cadaaligga ahi ushaqeeyo, doorka iyo fursaddaha uu leeyayah, iyo welibba sidda uu kalin buuxdda uga qaadan karo.
6. Waa in dulmanaha loo wergeliyaa si sharciga, dariiqooyinka iyo nidaamka cadaaligga ah wafaqsan, iyadoo kolba lala socodsiiyao kaalinta uu ka qaadan karo baarista, balameyn, go' aaminta iyo welibana lala socodsiiyo xaaldda denbiilaha kolba heerka ay mareyo.
7. Waa in dulmanaha laga war siiyaa adeegyada iyo mashaariicda loogu talo galay iyo weliba sida loo raadsado gunno lacageedyadda.
8. Nidaamyadda, mabaadiida iyo jirintaanka sharciyada nidaamka cadaaliga ah, waxaa lagama maarmaan ah in muhimad gaara la siiyaa aragtiyaha, danaha iyo jirintaanka dulmanayaasha.
9. Tababarka iyo tacliinta la xirriita addeegyada iyo gaarsiinta mashaariic horimarineed waa inay muhumad gaara siisaa danaha iyo baahidda kala duwan ee dulmanayaahsa oo dhan.
10. Waa in dulmanayaahsa la war geliyaa sida ugu haboon si ay uga hadlaan danhooda markay rumaysan yihiin inaan qawaaniintii la raacin.

Adeegyada iyo Barnaamijyo: Programs and Services:

Police-based Victims Services Units

Faracyadda addeegyadda dulmanayaasha ee Booliska kusalaysan:

Faracyada adeegyada dulmanuhu waxay sida badan ku yaalaan xaruumaha booliska. Faracyadaan waxay baaritaan kusameeyaan ka dib markii boolisku boooqdo dulmanaha iyo inta arimahooda yaalaan qaybta cadaalad denbiyedka.

Afhayeenada udooda dulmanaha waxay ka shaqeeyaan isla qaybta cadaalada danbiyada, waxeeyna siiyaan akhbaar, macaawimo, u dirid meel kale iyo gacan qabasho. Waxayna ka caawin karaan dulmanayaasha baritaanada booliska iyo socodsiinta kiisas denbiyedka ka yimid danbi la sameeyay. Adeegyadani waa kala duduwanaan karaan. Wuxaad kala xiriiiri kartaa warbixin dheeraad ah rugta boliiska meesha aad ku nooshahay ama RCMP kuugu dhow.

Community-based Victims Assistance Program

Barnaamijyada taakulanynta ee Dhibanaayasha ee ku Saleeysan Beesha:

Kuwani waa barnaamijyo iyo mashaariic u khaasa una faa'iideeya dulmanayaasha markay kiisas-koodu socdaan, sida caadiga ahna waxaa maamula wakiilada beesha. Waxaa laga yaabaa in eey ka helaan taakuleen boliiska xagiisa sida ugu fiican ee loo gacan qabankaro dhibanayaash.

Liiska hawlaha ku saleeysan Boliiska iyo hawlaha ku saleeysan Bulshad ee gacan qabashada dhibanaha barnaamijyada iyo bulshada ilahooda wax tarka daawada halkaanaad ka heli kartaa: www.victims.gov.ab.ca or contact:

www.victims.gov.ab.ca or contact:

Alberta Solicitor General, Victims Programs

10th Floor, J.E Brownlee Building

10365-97 Street, Edmonton, AB T5J 3W7

Telephone: (780) 427-3460 Fax: (780) 422-4213

Outside of Edmonton: dial 310-0000 (ask for victims Program)

La xiriiiri barnaamijga takulaynta dulmanaha ee kuugu dhow, weydiisana warbixiinaha kala ah:

- Warbixinta waxyeeladda dhibanaha
- Arjigga gunno lacageedka
- Warqadda codsigga diyadda

Barnaamijka Warbixinta Waxyeelada

Danbiga Ow U Geestay Dulmanaha

Victim Impact Statement Program

Waraaqda warbixinta waxyeelada dambiga waa dokomenti sharchiya ee dhibanaha dambii waxyeeleeyay u qoro garsooraha marka ay dacwada taal maxkamada. Waxaad xaq uleedahay inaad qorato warqada warbixinta waxyeelada dambiga. Waxaad ku sharxeysaa sida dambiga u waxyeeleeyay adiga iyo dadka xigtadaada ah. Kuma khasbanid inaad qorto warbixinta, adaa go'aanka iska leh. Waxaad kaloo doonankartaa qof kaa caawiya qoritaanka warbixintaada, laakiin sicad u qeex sida dhabta ah ee ay waxyeelo kuu gaartay **adigoo ku qoraya erayadaada**. Ujeedada laga leeyahay qoritaanka warbixin noocan ahi waxay tahay, in dulmanayaasha loo sahlo inay kaqaybqaataan nidaamka cadaaliga ah iyadoo sharaxaad laga bixinayo waxyeelada nolosha dulmanaha ka soo gaartay shilka dhacay, isla markaana laga dhaadhiciyo maxkamada iyo denbiilaha waxyeelada dulmanaha ka soo gaartay dambiga.

BAAQ:

- **Welligaa haka hadlin** shilku siduu u dhacay, habixin faalo ama dhaleecayn kuwajahan dembiilaha amaba nidaamka cadaaliga ah, amaba hasoo jeedin sidii denbiilaha loo xukumai lahaa.
- Haday adiga kuu fududahay, ku qor warbixinta afkaaga hooyo. Warbixinada noocan ah waxaa lagu qorikaraa **afkaad addigu jeceshahay** waxaana turjumi doona turjumaan ay maxakamadu dooratay.
- Haddii aadan qori karin waraaqda warbixinta, qof kale ayaa kuu qori kara. Haduu qofkale kuu qoro, ha u qoro sida aad adigu u tiri hadalka. Qofka kuu qoraya warbixinta waa inuu saxiixaa magaciisa iyo waxaad isu tiihin.
- Hadii dambigu waxyeelo gaarsiiyey dad kale oo wax isutihii, sida qof qoyskaaga katirsan, waxay iyana qoran karaan war bixin gooni ka ah taada.

Barnaamija Warbixinta Waxyeelada Danbiga Ow U Geestay Dulmanaha Waa Socotaa... Victim Impact Statement Program Cont...

XUSUUSNOW:

- Weligaa hayso koobi kuu gaara marka warbixinta qoritaankeedu dhamaado. Waxaa laga yabaa in warbixinta isbedel ku dhaco haddii xaaladaadu is badasho.
- U soo celi xoghaynta maxkamada marki aad buuxiso warqada warbixinta dulmanaha ee taal maxkamada gudaheeda.
- Waxaa lagama maarmaan ah inaad ogaato in warbixinta dulmanaha lagu furo maxkamada dhexdeeda marka xukumaada timaado oo kaliya amaba (denbigga lagu cadeeyo eedaysanaha), lana akhriyo waqtiga la xukumayo. Dulmanayaashu waxay fursad u leeyihiiin inay akhiristaan ama loo akhriyo warbixinta waqtiga xukunku dhacayo.
- Haddii eedaysanaha lagu cadeeyo denbiga oo jeelayni timaado, warbixintaada waxaa iyana loo diri doonaa qaybta jeelasha si tixgelin loo siiyo marka denbiilaha lasiideynayo.
- Warbixinta waxyeelada dulmanaha waxaa kaloo loo gudbiyaa xafiisyada sarkaalada sugnaanta iyo gudiyada caafimaadka maskaxda hadii ay ku haboonaato.

For more information: Akhbaar saa'id ah:

Foomamka Waxyeelada dulmanaha waxaa laga heli karaa adeegyada Booliska ee Xaafadaada; faraca adeegyada dulmanaha, barnaamija gargaarka dulmanaha ama adigoo la xiriirta:

Alberta Solicitor General, Victims programs
10th Floor, J.E. Brownlee Building
10365-97 Street, Edmonton, AB T5J 3W7
www.victims.gov.ab.ca

Telephone: (780) 427-3460. Fax: (780) 422-4213
Outside of Edmonton: dial 310-0000
(ask for victims program)

Tel: (780) 427-3460. Fax: (780) 422-4213
Edmonton dibadeedda wac lambarka: 310-0000 (Weeydiiso Barnaamija dulmanayaasha).

Barnaamijka Codsiga Diyada

Requesting Restitution Program

Diyo waa sida aw dambiiluhu kuugu gudo dhibaatadii kugu dhacday ee uu isagu sababay. In aad weeydiisato diyo waxaa lagaa rabaa in aad dhameeys tirto **foomka codsi diyo**, kaasoo boliisku ku siin karo. Foomka la dhameeys tiray waa in lagu celiyaa boliiska sida uga dhaqsaha badan. Boliisku wxuu foomkaa u diri doonaa qareenka dawlada oo go'aan ka gaari doona in foomkaas maxkamada la keeno iyo in kale.

Dhameeys tir foomka codsiga diyada sida ugu dhaqsaha badan ka dib markii la dhameeys tiro bareeraha markhaatiga.

In diyo lagu siiyo iyo in kale waxaa go'aankaas gaaraya garsooraha. Waxaa diyo ka hadli kara maxkamada oo kaliya marki xukun dhaco.

Waxaa laga yaabaa in garsooruuhu amro diyo markii dambi dhaco kadib taasoo ay kamid yihiiin: dhaawac, burburis, hanti dhuntay, dhaawac jireed (dhumid dakhli ku soo galayay ama macaawino), qarash kugu gaaray ka guuris guriga dambiihaha iyo hanti kaaga luntay in aad gadatay wax la soo xaday ama Deymisay lacag lagu gaday xoolo la soo xaday adoon ogeyn.

Hadii maxkamadu eey kuu xakumi weeydo Diyo ama aadan ku qancin inta diyo ahaan laguu siiyay arinkaada waxaad u dhigi Kartaa Maxkamada Madaniga ah.

For more information contact:

Warbixin kale oo ku saabsan Xaqa amaba diyoonka waxaad ka heli kartaa:

www.victims.gov.ab.ca or contact:

Alberta Solicitor General, Victims Programs
10th Floor, J.E Brownlee Building
10365-97 Street, Edmonton, AB T5J 3W7
Telephone: (780) 427-3460 Fax: (780) 422-4213

Outside of Edmonton: dial 310-0000 (ask for victims Program)

Warqaada xaqa amaba diyadda waxaad ka helikartaa farac adeegga dulmanaha amaba sarkaalka Boolis ee kiiskaaga baaridoona. Hadii aadan helin warqadda xaq ama diyadda, fadlan codso markale.

Barnaamijka Guno Lacageenta

Financial Benefits Program

Barnaamijka guno lacageedyadu wuxuu u aqoonsadaa dulmanayaasha uu dhaawac si toosa uga soo gaaray **denbiyo** dagaal oo ka dhacay Alberta gudaheeda. Barnaamijku wuxuu bixiyaa guno lacageed taasoo ku saleysan inta uu la egyptay dhaawaca. Cadadka gunada waxay ku saleysantahay qdobka, The victims of Crime Act.

Barnaamijka Guno Lacageenka ma bixiyo wax ku yimid kharash ama lumis caadiya. Matalan, ma bixiyo milki halawday, kharash daawo kaaga baxay, kharash ku baxay, mushaar lumay ama xanuun iyo dhibaato. Dhibanaha waxaa laga yaabaa in uu diyo raadsado ama ow talaabo madaniya qaado si ow wax uga helo Kan danbiga ka galay.

Waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay gunno lacageed hadii:

- Ka cabaneeyso dhaawac jirka ah ama niyad jab uu keenay denbi dagaal oo ka dhacay Alberta gudaheeda.
- Denbiga loo gudbiyey Booliska sidii ugu dhakhsaha badneyd dulmanuhu uu gacansiiyey markii baaritaanka denbigu socday.
- Arji gunno lacageedkana lagu soo gudbiyey **labo sano** guddaheed laga soo bilaabo maalintii denbigu dhacay.
- Aad awood u siisay, barnaamijka gunno lacageedyadda inuu raadiyo iyo inuu helo akhbaar muhiima si go'aan loogga gaaro arjigaaga.

Barnaamijka Guno Lacageedka

Financial Benefits Program Cont...

Hadii denbigu keeno dhimasho, qof kasta oo ka mida qoyska amaba qof kasta oo wakiil ka ah qofkii dhintay, ayaa codsankarto diyada qofka dhintay.

Kiisaska caruurta ama qof weyn ee ku cuuryaamay waxaa meteli kara qof masuul ka ah amaba qof alaale iyo qofkii ka socda dulmanaha ayaa dalbi kara.

Shakhsiyadka aan doonan karin gunno lacageed waxaa ka mid ah:

Qofk dembi lagu soo eedeeyey laguna xukumay waxyeelo katimid shilkii dhacay, dadka uusan dhawocu toos u gaarin (qof qoyska katirsan, markhaati goob jooga ahaa markii denbiggu dhacay), iyo dulmane shil baabuur, amaba waxyeelo hantiyeed oo ay keentay qof saraansan baabuur uu waday amaba guri lajebiyey oo loo dhacay.

Arji kasta, waxow qaataa mudo afar bilood ah ka dib marki arjiga la dhigay si aad go'aan u ogaato. Arji walba waa ka duwanyahay inta ow qaato in jawaab la helo.

Haday dhacdo inaad guno lacageed heli weydo, jeceshahayna inaad ka doodo, waxaa jira nidaam dib u eegideed. Guddigga dib u eegida dhaawacyada denbiyada waxay awood uleeyihii inay dib u eegaan, iyo in ay baaritaan madax banaan kusameeyaan go'aamadda gunno lacagedyadda.

For more information:

Akhbaar dheeraada kala xiriir:

www.victims.gov.ab.ca or contact:

Alberta Solicitor General, Victims Programs
10th Floor, J.E Brownlee Building
10365-97 Street, Edmonton, AB T5J 3W7
Telephone: (780) 427-3460 Fax: (780) 422-4213

Outside of Edmonton: dial 310-0000 (ask for victims Program)

Macnaha Ereyada

Glossary

Waqtidib u dhigid danbe	Nidaam la raaco oo dacwada la joojiyo ilaa waqtidib u dhigid danbe
Appeal/Racfaan	Racfaan qaadasho
Arji	Weeydiisasho, foom wax lagu warsado
Awood sharciyeed	Awooda sharciyeysan oo wax qasbi karta
Cadaalada Rayidka	Waxaa ka mid ah milki, arrimo dhaqaale, axdiyo, dhaawac iyo bur-bur. Wax-baa ka dhax dhici kara labo qofood oo muwaadiniina. Arrimaha rayidka kama badan karaan 6 qof gudiga maxkamadu saarto
Ilaalin sirta qofta	Sirta qarsoon ee qofka leeyahay taas oon lala wadaagin ama laga qariyo dadka kale ee aanay khusayn
Xukumid	Nidaamka ku eedaynta denbiyada qofku kagalay qof kale ee sharci maxakamadeed
Turjumaan maxkammadu dooratay	Qofka aqoon buxda uleh afkaaggaa hooyo kuu turjuma ama fasira waxa ka dhacaya maxakammadda
Denbi	U gudub qof kale xaqeeda.
Sharciga Nidaamka Dambiyada	Habka sharciga ah ee la maro marka maxkamad arinku joogo
Qareenka Dawlada	Qareenka u dooda dadweynaha oo wakiilka uga ah xagooda maxkamada
Qareenka difaaca eeddeeyanaha	Waa kan u dooda qofka eeddeeyanaha ah markii maxkamad la keeno
Shil ama masiibo	Fallal dhibaato iyo dhimasho keeni kara
Cadyn marqaati ahaan loo isticmaalo	Xaqiiqo ama wax iska cad oo marqaati ah
Gal	Waa warqaddaha lagu keydiyo warbixinaha (habka sharciyeysan) sidda haboon
Masuul ka ahaan qof kale	Qof si sharci ah masuuliyyad uga qaadi karo caruur ama qof aam caafimaadkeedu dhamayn.
Danbiile	Eeddeysane masuul ka ah denbi ama falal deelqaaf ku ah nidaamka denbiyada cadaaliga ah

Macnaha Erreyada

Glossary

Buug gacmeed	Buug yar oo gacanta amaba boorsada lagu qaadan karo
shil	Waa fal kuu hogaamiya ama kuu keena waxaad dhib ka dhaxasho
Waxyeelo	Awood xoog ah oo ku dhacday meel kale waxyeelana geysatay
Dhaawac	Fal gaystay dhaawac:ku xadgudub qofkale xaqiisa, taasoo sharciga awood u siineyso in aw wax ka qabto
Garsoore	Sarkaal dowliya oo awood loo siiyey inuu go'aamiyo dacwooyinka maxkamada
Sharci	Sharciyadda la aqoonsan yahay ee la raaco lana meel mariyo dib u xoojina ay dowladu ku samayso
Go'aan Baarlamaan	Sharci la gaaray oo goaamiyey in sharci la soo saaro
Meel ka dhac	Meel ka dhacyo sharciga lagu ganaaxi karo
Booliska	Qaybta dowliga ah ee qaabilsan ka hortaga, xiritaanka iyo ku soo eedeynta denbiyada iyo khaakhuulka shicibka
Barnaamijyo	Wax kasta oo horay loo qorsheeyay ama ku dhaqaaq
Ganaax/ciqaab	Ku soo rogid ganaaxyo wax allaale wixii meel ka dhacyo ah,
Dhaawac jirka ah	Xanuun, khal khal, dhibaateyn amaba jir xanuun ul kac ah
Sharciyeyn Nidaamsan	Awood sharci ah oo xadida nidaamka jira
Xaq amaba diyo wax u celin	Wanaajinta amaba siinta wax u qalma dhaawaca
xukumid	Wax sababa wax xanuu keena ka qoomameen
Adeegyo	Gacan qabasho ama ka uga faa'iideen qof kale
Adeege caawina dad-weynaha	Adeege caawina, qof siiya tallo, iyo in uu ku hagaajiyo wanaag Shil ama masiibo
Barwo (Maxkamad iska wacid)	Warqad maxkamadeed oo qofka laga rabo in uu yimaado waqtii cayiman iyo meel asagoo dhinaca qalkaa ah

Macnaha Erreyada

Glossary

Hanjabaad	U dhaarasho qof in aad waxyeelo u geysaneyso
Maxkamad saarit	Wareysi ka dahaca garsoore hortiisa and/ama gudi maxkamad saarto oo go'aan ka gaarata danbiilaha runtana lagu ogaado
Dibane (Dulmane)	Qofka denbi lagga galay, dhibaatayn amaba si xun ulla dhaqan
Adeegyada Dhibanaha	Barnaamijiyyada ama caawinaad loo fidiyo dadka waxyeelo ka soo gaartay dambe
Bareeraha markhaatiga	Cadyn marqaatiyeed ah hadal ama qoraal aw bixiyay qof dambe waxyeelleyay

Mahad Cellin Aqoonsi

Acknowledgments

Koox xusuus, oo isku jirta wadaagayaal ka kooban hogaamiyaal beebleed, shaqaale, iyo hayado matalayaa, waxeey mahadoo u fidinayaan maal-galintii book gacmeedkaan oo eey bixiyey Xeer Ilaaliyaha Guud ee Albeerta oo maal galiyey wax ka qabka danbiga Dhibanayaa laga galo.

Shaqsiyaadka soo socda oo hoos ku xusan iyo hayadaha wax ku taba rucay oo waqtii galiyay horo marintaan iyo tarjumida book gameedkaan:

Alberta Solicitor General & Public Security

Carol Sullivan

Terry Jorden

Alliance Jeunesse-Famille de l'Alberta Society

Kabwiz Rashel Tshinyembe

Luketa M'Pindou

Canadian Arab Friendship Association

Canadian Kurdish Friendship Association

Jalal Abbas

Consultants

Lina Tran

Pami Maghera

Community Members

Dafla Gebreyesus

Saleh Mohamed

Somkhuun Thongdee

Tigist Dafla

Dr. Thanh Trung Le

Association of Vietnamese Alliance Churches of Canada

Mahad Cellin Aqoonsi

Acknowledgments

Edmonton John Howard Society

Ann Howlett
Kathi Lewis

Edmonton Mennonite Centre for Newcomers

Mana Ali
Yohanness E. Yirsaw

Multicultural Health Brokers Co-operative

Yvonne Chiu
Marcela Olivares
Michelle Anderson-Draper
Nhan Lu
Ray-Mei Liu
Sabah Tahir
Surinder Dhaliwal
Susana Runge

The Sexual Assault Centre of Edmonton

Mary Banda

Women Advancement Trust (Tanzania)

Lucy Tesha Merere



SOLICITOR GENERAL
AND PUBLIC SECURITY

ISBN 0-7785-4332-3